

Fahamka Canshuurta Cutubka Bannaan



Laga bilaabo jannaayo 2023, dhammaan mulkiilayaasha hantida daganaanshaha waa inay soo buuxiyaan foom caddayn ah dhanka onleynka oo muujinaaya deganaanta hantidooda ee sanadkii hore.

Xog Muhiim ah:

- Caddaymaha waa in la soo gudbiyaa inta u dhaxaysa Jannaayo iyo Maarso 16, 2023.
- Caddaymaha waxaa laga yaabaa in hanti-dhawr lagu sameeyo iyadoo bixinta xog been ah ay keeni karto ganaaxyo dheeraad ah ama ciqaabo, sida ku qoran xeer-hoosaadka 2022-135. Fadlan hayso diiwaan kasta oo loo baahan yahay si loo xaqiijiyo cadeyntaada.

Sida loo gudbiyo cadeynta xaaladda hantidaada:

Gal akoonkaaga MyServiceOttawa oo arag faahfaahinta canshuurta hantidaada si aad u gudbiso cadeyntaada.

Waxa kale oo aad ku soo gudbin kartaa caddayntaada adiga oo booqda ottawa.ca/vut oo raaca tallaabooyinkan soo socda:

1. Guji "Gudbi Caddaynta"/("Submit Declaration")
2. Geli rool lambarkaaga iyo koodka gelitaanka (oo laga helaayo biilkaaga cashuurta ee ugu dambeeyay)
3. Geli faahfaahinta xiriirkaaga oo dooro xaaladda hantidaada. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad geliso macluumaad dheeri ah
4. Dib u eeg bogga kooban si aad u hubiso in macluumaadku sax yahay.
5. Guji: Gudbi"/("Submit")
6. Nuqul ka mid ah cadeyntaada ayaa lagu soo diri doonaa iimayl

FIIRO GAAR AH: qof ayaad siin kartaa fasax inuu soo gudbiyo cadeyntaada isagoo kaa wakiil ah.

Isku qor adeegyada Ottawa

Isku qor MyServiceOttawa si aad u gasho akoonkaaga cashuurta guryaha hab onleyn ah. Arag hadhaaga akoonkaaga, biilashii hore, cusboonaysii cinwaankaaga boostada iyo waxii kaleba.

Macluumaad dheeraad ah oo laga yaabo inaad ugu baahato xagga caddaymaha

Xaaladda Hantida ee Sanadkii Hore	Xogta la Ururiyay Wakhtigii Caddaynta
Deganaanshaha Rasmiga ah – Deggene la oggol yahay	Magaca iyo macluumaadka xiriirka
Hanti la kireystay	Magacaga kireystaha(yaasha) oo buuxa iyo macluumaadka xiriirka
Haddii la iibiyey	Taariikhda la dhammeeyey
Haddii ay dhacday Amar maxkamadeed/Amar Dowladeed	Lambarka amarka maxkamadda/lambarka tixraaca
Haddii laga dhintay	Taariikhda dhimashada
Lahaanshe la Daryeelo	Magaca qofka la daryeelo Magaca macluumaadka xarunta iyo macluumaadka xiriirka
Dhisid/Dib u hagaajin	Ruqsad/lambarka codsiga Faahfaahin gaaban ee mashruuca
Kireysiyada buulasha	Lambarka muddada gaaban ee kireynta buulka